

**Xeerka Wasaaradda Warshaddaha iyo Ganacsiga  
Xeer lamba. 209 ee 27 Febarayo 1968**

## **XADIIDEYTA QIIMAHA BADEECADA GUUD EE DARUURIGA**

### **WASIIRKA**

Kadib markii la arkay qodobka 83 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay Sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 iyo wax ka bedelidii Xeernidamiyaha Dowladda;

Kadib markii la arkay qod. 14 ee Sharciga lamba. 17 ee 17 Juun 1967 oo awood siinaya Wasiirka in uu Xeer soo saaro oo ku xeerayo habeynta iyo qeybinta iyo iibinta badeecada daruuriga iyo ka ganacsigooda;

Kadib markii la garoowsaday baahida in la xadiido qiimaha badeecada daruuriga ah oo ku tilmaaman shaxda halkan ku lifaaqan ee sharciga lamba. 17 ee 17 Juun 1967;

Kadib markii la dhegeystay aragtida Guddiga La-talitanka ee kormeerka qiimaha badeecadaha daruuriga.

### **WAXAA LA SOO SAARAY**

#### **Qod. 1**

Laga bilaabo isla waqtigaan waxaa ka hirgeli doono Gobolka Benaadir amarradda lagu xakameeynaya badeecadaha daruuriga ah oo ku tilmaaman shax ku dheggen Dekreetadan waxaa lagu iibin doona qiimaha halkaas lagu qoray.

#### **Qod. 2**

Dekretada lamba. 171 ee 10 Setember 1967 ee khuseysa xadideynta qiimaha badeecadaha daruurig ah waa la buriyey.

#### **Qod. 3**

Dekrretadaan waxay hirgeli doonta maalinta ku xigta markii lagu soo daabaqo Faafinta Rasmiga ah waxaana lagu keydin doonaa Keyda Rasmiga ah ee Shuruucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 27 Febarayo 1968.

### **WASIIRKA**

**HARED FARAH NUR**

---

**Magaca**

<b>Kaffe</b>	<b>Kaffe iyo Cappuc. Caano</b>	<b>Shah Aranjo</b>	<b>Sbramuto ma' saxa</b>	<b>Biyo Sbramutoliin</b>	<b>sharbeed</b>
<b>So.</b>	<b>So.</b>	<b>So.</b>	<b>So.</b>	<b>So.</b>	<b>So.</b>

**Nooc 1**

1. Shebelle	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55
2. Jubba	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55
3. Bar Qar	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55
4. Bar Azan	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55
5. Bar Lido	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55
6. B 3 fonta	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55
7. BGezira	0,35	0,70	0,45	0,70	0,45	0,70	0,35	0,75	0,65	0,45	0,55	0,55

**Nooc 2**

8. B Super C	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
9. B Ala C	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
10. B Cele.	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
11. B Sav	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
12. B Alto J	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
13. B Fiat	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
14. B Roma	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50
15. A Agip	0,30	0,65	0,40	0,65	0,30	0,70	0,60	0,40	0,70	0,50	0,50